# Gelidda Sharci-darro

## Waa maxay gelidda sharci-darro ?

Gelidda sharci-darro waa markii ay dad soo galaan dhul ama dhismo ayagoo gebi ahaanba loo ogoleyn inay joogaan ama galaan aagaas, ama wuxuu dhacaa markii dadka jebiyaan shuruudaha lagu soo gelo dhul ama dhismo. Guud ahaan, shuruudaha gelitaanka ayaa ah shuruudaha hoos yimaada ee xubnaha shacabka guud ay ku gali karaan dhul ama dhismo khaas loo leeyahay.

## Waa maxay Gelidda Sharci-darro ee Heerka 1[aad]?

"Qofku wuxuu dambiile ku yahay gelidda sharci-darro ee heerka koowaad haddii asaga ama ayada oo og inuu sharci-darro yahay soo galo ama sii joogo *dhismo*." SMC 12A.08.040.A.1 (Carrab ku adkeyn la raaciyay.).

"Gelidda sharci-darro ee heerka koowaad waa falxumo qayaxan." SMC 12A.08.040.A.2. Ciqaabta ugu badan waa 364 maalmood oo xirig ah iyo $5,000 oo ganaax ah.

## Waa maxay Gelidda Sharci-darro ee Heerka 2[aad]?

"Qofkuu wuxuu dembiile ka yahay gelidda sharci-darro ee heerka labaad haddii asaga ama ayada oo og inuu sharci-darro yahay soo gelo ama sii joogo *dhul ama guri* dad kale leeyahay markii sharci-jebintooda uusan eheen gelidda sharci-darro ee heerka koowaad." SMC 12A.08.040.B.1 (Carrab ku adkeyn la raaciyay).

Gelidda sharci-darro ee heerka labaad waa fal. SMC 12A.08.040.B.2. Ciqaabta ugu badan waa 90 malmood oo xirig ah iyo $1,000 oo ganaax ah

## Waa maxay difaaca ku waafiqidda leh ee gelidda sharci-darro?

SMC 12A.08.040.C wuxuu sheegaaya:

> Ciqaab-marin walba ee hoos yimaada SMC 12A.08.040 A ama B, uu yahay difaac ku waafiqid leh kaas:
>
> 1. Dhismaha khuseeya dembi hoos yimaada Qaybta 12A.08.040 A uu ahaa mid laga tegey; ama
> 2. Dhismaha goortaas u furnaa shacbka iyo eedeysanaha raacey shuruudaha sharciga ee gelidda ama joogidda dhismaha; ama

3. Eedeysanaha si macquul ah u aaminsanaa in qofka iska leh guriga, ama qofka wakiil ka ah shati bixinta gelitaanka uu asaga ama ayada u fasaxey inuu galo ama joogo dhismaha ama dhulka; ama

4. Eedeysanaha isku dayaayey inuu raaco hab-socod sharciyeed, oo ku jiro dokumenti walba ee loo baahan yahay ama la ogol yahay in la baxsho ama la siiyo dad ama hanti sida u qabo sharci kasta, xeer, amar, nidaam ama amar maxkamadeed, ay ku jirin kuwa lagu keeno boostada Dalka Maraykanka. Difaacaan wuxuu quseeyaa oo kaliya haddii eedeysanaha uusan gelin guri khaas loo leeyahay ama dhismaha u furnaa shacabka iyo soo gelitaanka dhismaha uu ahaa mid macquul ah iyo loo baahnaa si loo baxsho dokumentiga sharciyeed.

## Waa maxay shuruudaha caadiga ah ee soo gelidda dhismo ama dhul ganacsi ahaan loo isticmaalo?

Shuruudaha soo gelitaanka waa shuruudaha xubnaha shacbiga ku soo geli karaan badanaa dhulka ama dhismooyinka ganacsiga. Shuruudahan guud ahaan waxaa ka mid ah:

- Waa in qofka ahaado macmiilka ganacsiga;
- Waa inuusan gef u geysan sharci kasta ee u yaala Dawladda Hoose ee Seattle ama Xeerka la Badalay ee Washington; iyo
- Waa in qofka gelo saacadaha shaqada ganacsiga.

## Maxaa ku dhacaya qofka jebiyo shuruudaha soo gelitaanka?

Shakhsiyaadka la siiyo ogeysiiska shuruudaha soo gelitaanka, ha noqoto calaamad ogeysiis oo dhegan, , mid qoraal ah, ama si oraah ahan u bixiyo qof awood u leh inuu ilaaliyo shuruudaha soo gelitaanka, haddii markaa ka dib qofkaas jebiyo shuruudaha soo gelitaanka waxaa lagu xiri karaa gelid sharci-darro. Caadi ahaan, hase-yeeshe, dadka shuruudaha jebiyey marka koowaad didgniin ayaa la siiyaa iyo waxaa la ogeysiiyaa inay jebiyeen shardiyada soo gelitaanka ama in fasaxa ay ku jogaan dhulka ama dhisamaha lala noqday, iyo waxaa la siiyaa fursadda ay dhulka ama dhismaha kaga baxaan ka hor intii la xirin. Haddii ay sii wadaan oo ay diidaan shuruudaha soo gelitaanka ama ay diidan inay baxaan markii laga codsado, waxaa lagu xiri karaa gelid sharci-darro.

## Barnaamajka Heshiiska Gelidda Sharci-darro

### Waa maxay Barnaamajka Heshiiska Gelidda Sharci-darro?

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Magaalada Seattle iyo Waaxda Booliska Seattle, oo la shaqeeya Mashruuca Farqiga Jinsiga, waxay soo saareen hab-socodyo cusub si looga hortago arrimaha gelidda sharci-darro ay jaaliyadaha la kulmaan. Barnaamajka Heshiiska Gelidda Sharci-darro waa heshiis ka dhexeeyo dadka iska leh dhulka ama dhismaha, ganacsatada iyo Waaxda Booliska Seattle si loo ilaaliyo shuruudaha soo gelitaanka dhulkooda ama dhismahooda khaaska u ah. Kani waxaa ka mid ah in dadka loo diido inay soo galaan guriga, ama in dadka loo fasaxo inay galaan dhulka ama dhismaha ayadoo la raacaayo shuruudo gaar ah. Shuruudaha oo lagu xoojin karo Barnaamajka Heshiiska Gelidda Sharci-darro waxay ku qoran yihiin heshiisyada iyo waxay ku qoran yihiin dhismaha. Markii ay heshiiska la saxiixaan Waaxda Booliska Seattle, milkiilayaasha waxay saraakiisha booliska u ogolaanaayaan inay digniin siiyaan dadka si sharci darrada ku soo geley dhulkooda ama dhimahooda ka dibna xiraan dadka gefafka u geystey sharuudaha markaay milkiiliyaasha aysan joogin.

### Ma ka qayb qaadan karaan dadka guryaha khaaska ah Barnaamajka Heshiiska Gelidda Sharci-darro ?

Maya, guud ahaan dhismooyinka caadi ahaan u furan shacbiga inay soo gelaan ayaa ka qayb qaadan karo Barnaamajka Heshiiska Gelidda Sharci-darro. Guryaha khaas loo leeyahay iyo dhismooyinka qoysas badan degan yihiin xaq uma lahan Barnaamajka Heshiiska Gelidda Sharci-darro, aysan ka eheen haddii ay firaaqo yihiin.

### Waa maxay mas'uuliyadda milkiilaha markii la eego barnaamajka gelidda sharci-darro?

Milkiilayaasha waxay qabaan mas'uuliyado badan oo ku qoran heshiiska. Gaar ahaan, milkiiilayaasha waa inay ku dhejiyaan calaamad shacabka uga digeysa shuruudaha soo gelitaanka dhulka ama dhismaha, iyo waa inay la shaqeeyaan

ciqaab-marinta dadka lagu eedeyay gelid sharci-darro ama dembiyo kale. Meesha calaamaddaha qoraalada lagu dhejiyo iyo digniinta ku qoran ayaa laga-marmaan uh ciqaab-marin lagu guuleysto. Milkiilayaasha dhulka ama dhismaha waxaa lagu dhirri-gelinayaa inay la shaqeyaan saraakiisha SPD iyo Xeer Ilaaliyaha Isku-xiraha Degmada (Precinct Liaison Attorney) si loo hubiyo in dhulkooda ama dhismoyinkooda si habboon calaamaddaha qoraaada loogu dhejiyey.

**Sidee uga qayb-qaataa Barnaamajka Heshiiska Gelidda Sharci-darro ?**

Dadka iska leh ganacsiyada waa inay la xiriiraan saldhigga booliska degmadooda si ay u helaan foomka fasaxa gelidda sharci-darro. Kani waxaa lagu samayn karaa qof ahaan adiga oo taga saldhigga laftigeeda ama si email ah. Waxaad su'aal walba oo khuseeya barnaamajkaan u diri kartaa cinwaanada emailka ee hoos ku qoran:

NPrecinctTrespassProgram@seattle.gov

WPrecinctTrespassProgram@seattle.gov

SPrecinctTrespassProgram@seattle.gov

SWPrecinctTrespassProgram@seattle.gov

EPrecinctTrespassProgram@seattle.gov

**Yaa digniin ku bixin karo Barnaamajka Heshiiska Gelidda Sharci-darro ?**

Dhismooyinka hoos yimaada Barnaamajka Heshiiska Gelidda Sharci-darro, waxaa shakhsiyaadka digniin siin karo inay jebiyeen shardiyada soo gelitaanka saraakiisha Waaxda Booliska Seattle ama wakiilada milkiilaha dhismaha ama qof leh awoodda uu ku hirgeliyo shuruudaha soo gelitaanka iyo waxay xittaa u digi karaan in la xiri doono haddii ay mustaqbalka dib u jebiyaan shuruudaha. Haddii qofka shakhsiyaadka siinaayo digniinta jebinta shuruudaha soo gelitaanka ama la noqoshada fasaxa soo gelitaanka guriga uu yahay milkiilaha guriga ama qofka guriga kireysto, markaa milkiilada ama qofkaas guriga kireysto waa inay diyaar u noqdaan inay la shaqeeyaan maxkamadda markii dembiilaha lagu ciqaab-marinayo gelid sharci-darro.

**Miyay dhacaan digninta ah gelidda sharci-darro?**

Maya, markii qofka loo sheego shuruudaha soo gelitaanka oo la ogeysiiyo inay jebiyeen shuruudahan, digniinta ma dhacayso.

**Miyuu milkiilaha leh dhul ama dhismo hoos yimaada Barnaamajka Heshiiska Gelidda Sharci-darro weli shakhsiyaad u diidi karaa inuu soo gelo dhulkooda ama dhismahooda?**

Haa, sharci walba ee khuseeya gelid sharci-darro waa sii dabakhmaayaa iyo milkiilaha dhulka ama dhismaha weli qof ayuu u diidi karaa dhulkooda ama dhismahooda waqtiga ay doonaan. Qofka leh awoodda uu ku macneeyo shardiyada soo gelitaanka ama la noqoshada fasaxa lagu joogo dhulka ama dhismaha waa inuu diyaar u noqdaa inuu maxkamadda markhaati ka noqdo in asaga ama ayada la noqdey fasaxa uu ku joogo dhismaha ama dhulka iyo in qofkaas diidey inuu ka baxo ama ku soo laabtey dhulka ama dhismaha. Dadka iska leh guriga waxaa lagu dhirri-geliyaa inay haystaan diiwaan gelin faah-faahsan ee dadka si sharci darro ku soo geley dhulkooda ama dhismahooda, gaar ahaan haddii qofkaas uu ahaa qof ay u diideen inuu soo gelo.

**Miyeey milkiilayaasha dhul ama dhismo khaas loo leeyahay oo aan ka qayb-qaadanin Barnaamajka Heshiiska Gelidda Sharci-darro bixin karaan digniinta sharci-darro?**

Milkiilayaasha si khaaska u leh dhul ama dhismo oo aan ka qayb-qaadanin Barnaamajka Heshiiska Gelidda Sharci-darro waxay samaysan karaan hab-socodyadooda si ay u nidaamiyaan shuruurdaha soo gelitaanka dhulkooda ama dhismahooda. Si loo sameeyo ciqaab-marin guul leh, waa in qofka awood u leh hirgelinta shuruudaha soo gelitaanka iyo dib ula noqoshada fasaxa uu ku joogo dhulka ama guriga oo diyaar u yahay inuu shakhsi ahaan markhaati ka baxiyo in qofka (1) ogaa ama laga rabey inuu ogaado shuruudaha soo gelitaanka, (2) jebiyey shuruudaha soo gelitaanka ama lala noqdey fasaxa uu ku soo gelo dhulka ama dhismaha, iyo (3) qofka diidey inuu joojiyo akhlaaq-xumada, ka baxo ama ku soo laabtey dhulka ama dhismaha ka dib markii fasaxa lala noqdey. Milkiilayaasha waxaa lagu dhirri-gelinaaya inay hayaan diiwaan gelin faah-faahsan oo khuseeyaa soo gelitaanka sharci-darrada ee dhulkooda ama dhismahooda.

**Miyeey saraakiisha xiri karaan dadka jebiya digniinta gelidda sharci-darro uu siiyey milkiilayaasha dhulka ama dhismaha oo aan hoos imaanin Barnaamajka Heshiiska Gelidda Sharci-darro?**

Haa, dhammaan sharciyada gelidda sharci-darro way sii jiriyaan . Saraakiisha ayaa iska leh go'aanka ah in ay xiraan dadka u gefa oo si sharci-darro ku soo geley dhul ama dhismo walba markii ay haystaan cabasho la xaqiijiyay iyo wada-shaqeyn, oo ay ku jirto kuwa guryaha aan hoos iman barnaamajka gelidda sharci-darro.

### Waa maxay eedeynta dembiyeed ee lagu soo rogi karo dembilayaasha jebiyey barnaamajka gelidda sharci-darro?

Gelidda sharci-darro ee Heerka 1[aad] (dhismo gudaheeda) – falxumo qayaxan; ciqaabta ugu badan waa: 364 maalmood oo xirig ah iyo $5,000 oo ganaax ah.

Gelidda sharci-darro ee Heerka 2[aad] (dhismo dibeddiisa) – fal; ciqaabta ugu badan waa: 90 maalmood oo xirig ah iyo $1,000 oo ganaax ah.

### Barnaamajkaan gelidda sharci-darro miyuu badelaa sharciyada iminka jiro ee gelidda sharci-darro?

Maya, Barnaamajka Heshiiska Gelidda Sharci-darro ma beddelo nidaamyada sharciga. Sarkaalada weli waxay xiri karaan dadka jebiyey sharciga SMC 12A.08.040 (Gelidda sharci-darro) ee dhulka ama dhismaha khaas loo leeyahay ayadoo la eegin haddii uu jiro heshiiska digniinta gelidda sharci-darro haddii uu qof awood u leh dejinta shardiyada soo gelitaanka ama la noqoshada fasaxa soo gelitaanka dhul ama dhismo uu horey shakhsiyaadka siiyey digniin inuu si sharci-darro ku soo geley iyo diyaar u yahay inuu markhaati ka noqdo digniintaas.

## <u>Barnaamajka Gelidda Sharci-darro ee Beeraha Nasashada (*Parks*)</u>

### Waa maxay Barnaamajka Gelidda Sharci-darro ee Beeraha Nasashada?

Barnaamajka Gelidda Sharci-darro ee Beeraha Nasashada Magaalada wuxuu la mid yahay Barnaamajka Heshiiska Gelidda Sharci-darro. Waaxda Beeraha Nasashada waxay qaateen xeerar u yaala Beeraha Nasashada Magaalada oo waxay ku qoreen qaar ka mid ah Beeraha Nasashada. Waaxda Booliska Seattle, Askarta Beerta Nasashada, iyo kuwa kale ku cayiman Kormeerida Beeraha Nasashada ayaa macneyn doono shardiyada soo gelitaanka iyo digniinta gelidda sharci-darro siin

doono shakhsiyaadka jebiyey Shardiga Beerta Nasashada, sharciyada kale ee deegaanka, ama sharciga dawladda.

Waxaa kaa gaar u ah, Askarta Beerta Nasashada waxay qori karaan dalab-maxkamadeedyada dambiyada gaarka ah ee jebiyo Shardiyada Beerta, iyo sarkaalada booliska waxay qori karaan dalab-maxkamadeedka shacabka ee Xeerka Dawladda Hoose ee Seattle ama gefafka Xeerka La Badaley ee Washington ama dadka ayeey xiri karaan haddii ay falaldambiyeed ah gelaan.

**Miyuu Barnaamajka Gelidda Sharci-darro ee Beeraha Nasashada loo isticmaali karaa dhammaan dhulalka ay Beeraha Nasashada leeyihiin?**

Haa, Barnaamajka Gelidda Sharci-darro ee Beeraha Nasashada wuxuu u dabakhma dhammaan dhulalka ama dhismooyinka ay leeyihiin Beeraha Nasashada.

**Digniinta  gelidda sharci-darro ee Beeraha Nasashada miyuu dhacaa?**

Maya, digniinta gelidda sharci-darro ee Beeraha Nasashada ma dhaco.

**Maxaa ku dhacaayo shakhsiyaad jebiyey Shuruuda Beerta ka dib markii la siiyey digniinta gelidda sharci-darro?**

Haddii qofka la siiyey digniinta gelidda sharci-darro uu diido inuu ka baxo ama joojiyo akhlaaqda sharci-darrada ah ama dib ugu soo laabtey dhul ama dhismo uu Beerta Nasashada leeyahay iyo jebiyo shardiyadooda ama sharciyada kale ee dabakhmo, qofkaas waxaa lagu xiri karaa dembiga gelid sharci-darro.

**Sidee qof loo diidi karaa inuu soo  gelo Beer Nasasho?**

Shaqaalaha Beerta iyo Saraakiisha Booliska ayaa diidi kara:

Haddii akhlaaqda digniinta gelidda sharci-darro uu sabab u yahay halis macnoowi ah in dhaawac jireed ama wax-yeello gaaro dhulka ama dhismaha, markaa qofkaas waa laga saari karaa iyo waa loo diidi karaa inuu soo gelo beerta nasashada ilaa maalinta xigta.

Haddii akhlaaqda uu ku jiro dambi-wayn ama jebinta shuruudaha hubka, markaa qofka waxaa loo diidi karaa inuu ilaa hal sano soo  gelo dhulka ama dhismooyinka beerta nasashada.

Ka-saarista uu Maxkamadda Amrey:

Markii la sameynaayo ciqaab-marinta, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Magaalada wuxuu garsooraha ka codsan karaa inuu soo dejiyo Amarka Xiriir La'aanta oo Beer Nasasho gaar u ah ama ku toosan Beero Nasasho badan.  Amarka Xiriir La'aanta wuxuu dabakhmi karaa:

- Markii qofka dembi lagu eedeeyo;
- Ayadoo shuruud u ah sii daynta xabsiga intii laga dhammeystiraayo arrinta dembiga; ama
- Markadembi ku xukumidda, kaasoo qayb ka ah xukunka dembi ama shuruuda sii daynta tijaabada ah.

**Maxaa ku dhacaya shakhsiyaad soo gala ama sii joogo beer nasasho ka dib markii loo diidey inuu soo gelo?**

Ayadoon ku jirin hadalka Badalaadka Koowaad ee Sharciga, shakhsiyaad walba oo soo gelo ama sii joogo beer nasasho loo diidey ama laga sarey waa la xiri karaa iyo waxaa lagu ciqaab-marin karaa gelid sharci-darro .